Barnaamijka BRIARR ardayda wuxuu siiyaa fursad ay ku bartaan nolosha beeraha waaweyn

Caruurtaada ma ka mid yahay ardayda wax ka barta dugsiga sarre oo raadinaya inuu helo waayo-aragnimo ardayda fasalkiisa ee dunida ku nool? Waxaa suurtagal ah in baraanmijka xarunta " Burnt River Integrated Agriculture/Science Research Ranch (BRIARR) ay tahay meesha ku haboon inay waayo-aragnimadaasi ka helaan. Goobtan waxaa afar saacadood ka jirtaa bariga magaalada Bend, ardayda wax ka barta iskuulka Burnt River Charter School waxa ay nool yihiin qoys leh beer weyn oo qiyaasteedu tahay 13-acre. Barnaamijka BRIARR wuxuu ardayda siiyaan casharo ay gacanta ka qabanayaan oo beeraha iyo sayniska deegaanka, iyo iyada oo ay helayaan fursado ay kula noolaadaan iskuul yar,iyaga oo shaqeynaya la ardayda kale ee ka yimid dunida dacaladeeda kale/

“Iminka waxa aan haynaa tiro ku dhow 19 arday oo dugsiga sarre ah," ayey tiri Krystal Swindelhurst, madaxa barnaamijka Dugsiga Degmada Burnt River. " Waxa aanu leenahay lo', ri'yo iyo digaag ay ardaydu xannaaneyso. Waxa jira waxayaabo fara badan oo ay masuul ka yihiin. Waxa iyana halkaas ay ka baranayaan waxyaabo faro badan oo xaqiiqdii dunida si dhab ah uga dhaca, waxa ay sidoo kale ay ka shaqeynayaan gacanta isla goobta.”

Ardaydu waxa ay ku noolaan karaan beertan weyn simister ama sanad-dugsiyeedka oo dhan, iyaga oo bixinaya kharashka kaliya gaadiidka lagaga soo qaadayo laguna geynayo beerta iyo waxyaabaha ay shakhsi ahaan u isticmaalaan ee ay ka mid yihiin(dharka, alaabta loo adeegsado musqulaha). Sanadkii la soo dhaafay Xeer-dejiyaasha Oregon waxa ay ku gargaareen bilowga barnaamijkan hal inay kharashkooda ku baxaya ay maalgaliyaaan.

“Waxa aan arkay ardayadii yareyd oo isbedel ku dhacay markii ay soo noqotay, waxaad ku arkaysaa inay hawlkarnimo badani ka muuqato iyo kalsooni ayna lahayn gabdhahani markii hore ee ay tegtay bilowgii markii ay ku jirtay fasalka 10naad," sidaas waxaa tiri Kitty Boryer, waa hooyada dhashay Ellie Boryer, iminka ku jirta fasalka 11naad ee Dugsiga Sarre ee Madison.

Sanadkii la soo dhaafay Xeer-dejiyaasha Gobolka Oregon waxa ay siiyeen $260,000 oo lacag sidii ay ardayda wax ka barata magaalooyinka u keeni lahaayeen iskuulkan. Ardaydu waxa ay sidoo kale helayaan dhibco ah kuwa jaamacada. Swindelhurst waxa ay tiri waxa ay rajeyneysaa arday fara badan oo reer Portland ah ayaa tixgalinaya una arka badeel inay doortaan sidii ay u tegi lahaayeen iskuulkani.

“Waxa noo yimid oo nala jooga arday ka kala timid Brazil, Germany, South Korea, Thailand , waqitgani xaadirka ah.”

-Pamela Jordan